# SAWIRIDA XISAABTA

## QAAB DHISMEEDKA

- Dulmarka Hawlaha & Diyaarinta (5-10 daqiiqo)
- Hordhac (2 daqiiqo)
- Hawlaha & Falanqayn (10-15 daqiiqado)
- Xiritaanka (5-10 daqiiqo)

## UJEEDOOYINKA

**Dhamaadka hawshan, ka qeybgalayaasha waxay awoodi inay:**

- Aqoonsadaan noocyada kala duwan ee xisaabta khibradahooda maalinlaha ah
- Aqoonsadaan inay inta badan xisaab la sameeyaan carruurtooda iyaga oo aan ogayn inay xisaab samaynayaa

## WAQTI

## 25-50 DAQIIQO

Hawshani waxa ay caawisaa waalidiinta inay noqdaan kuwo og mawduucyada xisaabta oo kala duwan, ka danbeeya lambarka iyo qaab fudud, ku jirta hawlaha maalin-kasta.

## AALADAHA

Diyaari 1 & 2 muuqaal (sawirro muujinaya nolol maalmeedka dadka)



**HAWLQABAD 2.3**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

SAWIRIDA XISAABTA
# IS DIYAARINTA
QORAALADA QABANQAABIYAHA

## XALKA SU'AALAHA

Isticmaal hagaha jawaabta si aad u siiso waalidiinta faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan jawaabaha hawl kicinta. Sawir kasta, hagaha jawaabta wuxuu bixiyaa jawaabo muunad ku ah su'aasha, "Aaway xisaabtu?"

## AWOODDA DHISMAHA

Hawshani waxay ku dhisan tahay cutubka **Xisaabta Ayaa Ka Badan Tiro** laakiin uma baahna dhamaystirka cutubkaas (Cutubka 1aad, Qaybta 3)

## ISBEDDELKA

**Isticmaal fikradahan si aad wax uga beddesho hawsha ku salaysan:**

- Da'da ilmaha
- Waqti iyo agab la heli karo si loo hirgeliyo
- Taageerada waalidiinta

## TALOOYIN

**Qoraalka buluuga ahi wuxuu tilmaamayaa in qabanqaabiyaha ay oran karaan (tusaale, "Maxaa ka dhex dhacaya sawirkan?"). Qoraalka caadiga ah ama joogtada ahi waa macluumaadka qabanqaabinta.**



**HAWLQABAD 2.3**
**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**
© 2025

SAWIRIDA XISAABTA

# IS DIYAARINTA

QORAALADA QABANQAABIYAHA

## DULMARKA HAWLAHA

Hawshan, waalidiintu waxay fiirin doonaan dhowr sawirro oo muujinaya nolol maalmeedka qoyska, waxaadna waydiin doontaa inay ka hadlaan meesha ay "ka arkaan xisaabta" sawir kasta.

Marka lagu muujiyo xisaabta waayo-aragnimada joogtada ah iyo goobaha, waalidiintu waxay noqon karaan kuwo aad uga warqaba xisaabta horay uga jirtay deegaanka ilmahooda.



**HAWLQABAD 2.3**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

## SAWIRIDA XISAABTA
# IS DIYAARINTA

## DIYAARINTA
### 10 Daqiiqo

Dooro dhowr muuqaal oo aad ka doorato inaad u isticmaasho hawsha adiga oo go'aaminaya kuwa aad ku qanacsan tahay. Baro sawirada, oo hubi inaad "ka heli karto" xisaabta sawir kasta. Dib u fiiri Hagaha Jawaabta ee lagu bixiyay si aad diyaar ugu noqoto inaad soo jeediso talooyin ku saabsan meesha ay xisaabta kaga taal sawir kasta.

Hawshan, isku day inaad diiradda saarto ka doodista dhowr mawduuc oo xisaab ah intii aad ka hadli lahayd hal ama laba mawduuc oo xisaab ah oo dhan. Inta badan waalidiintu ayaa yaqaana dhammaan mawduucyada xisaabta, waxay u badan tahay inay ku raaxaystaan isticmaalka mawduucyo xisaabeed oo kala duwan oo ay si joogto ah ugula sheekaysan karaan carruurtooda.

Waxa kale oo laga yaabaa inaad rabto inaad dib u fiiriso sharraxaadaha kooban ee mawduucyada xisaabta hore ee muhiimka ah ee laga heli karo:

https://familymath.stanford.edu/toolkit

Si aad hawshan ula isticmaasho waalidiinta, sii diyaarso deegaankaaga wakhti hore.

Haddii aad isticmaalayso qalabka filinka lagu muujiyo, u habeyso kuraasta waalidiinta si ay u arkaan shaashada ama darbiga aad ku tusi doonto sawirrada maalinlaha ah si aad u waydiiso, "Aaway xisaabta?"

Haddii aad hawshan ku qabaneysid adiga oo kala xiriiraya khadka oo aan isla joogin, iska hubi in aad kor u qaadayso sawirradii aad rabtay, oo ogow sida loo "wadaago shaashadda" si habboon. Qorshee haddii aad rabto inaad "wadaagto" shaashaddaada oo dhan, ama aad isticmaasho hal daaqad oo sawirro leh.

Ku sii shub faylka sawirrada qaab kasta oo aad kusoo bandhigi lahayd oo aad isticmaasho, si sawirrada aad tusaysid ay diyaar kuugu noqdaan.

Haddii aad rabto inaad isticmaasho Instagram (#parentscount #waalidkuwaytirsanyihiin), soo diyaarso baraha intarnetka.




© 2025

## SAWIRIDA XISAABTA

# HAWLQABAD

## Isbarasho

3-5 Daqiiqo

Soo bandhig hawsha. Tusaale ahaan, waxaad dhihi kartaa, **"Maanta waxaan ka hadli doonaa mawduucyo xisaabeed oo kala duwan iyo meesha oo ay ka muuqdaan waayo-aragnimada maalin kasta."**

U soo bandhig waalidiinta liis ah mawduucyo xisaabeed: "Waxaan ka hadli doonaa wax badan oo ku saabsan mawduuc kasta oo xisaab ah markaad nala wadaagto fikradahaaga, laakiin hadda halkan waa liis mawduucyada xisaabeed ee kala duwan ee laga yaabo inay soo baxaan markaad la hadlayso ilmahaaga."

- Cabbiraad
- Tirin
- Tiro ama nambar
- Qaababka
- Qaab
- Xiriirka Dhulka

Mawduuc kasta oo xisaabeed, tax dhawr tusaale. Haddii aadan aqoon u lahayn mid ka mid ah mawduucyada, dib u fiiri sharaxaadaha laga heli karo https://familymath.stanford.edu/toolkits/

Xusuusi waalidiinta inay u badan tahay inay isticmaalaan xisaabta in ka badan inta ay u malaynayaan inay isticmaalaan, iyo inay jiraan dhawr mawduuc oo xisaabeed oo kala duwan, sida isku-darka iyo kala-goynta, cabbirka, qaababka, tirada, iyo booska iyo goobta. Waalidiinta (iyo carruurta) inta badan waxay sameeyaan xisaab iyagoon ogaanin, xisaabta ay isticmaalaanna waxa ku jira mawduucyo aan ahayn tirooyin iyo magacaabista qaabab fudud.

## HAWL IYO FALANQAYN

**Qaybta 1aad**: 10-15 Daqiiqo

Soo bandhig sawir kasta oo ku jira warqadda waalidka la siinayo, midba mar. Sheeg isla markiiba sawir kasta, sida, "Ilmaha wuxuu haystaa baabuurta ay ilmahu ku ciyaaraan. Aaway xisaabta?"

Weydiiso waalidiinta inay ka wada hadlaan noocyada xisaabta ee ka dhici karta xaaladan. Sawir kasta waa tusaale xisaabta ee hawl maalmeedka; ujeedadu waa in diirada la saaro mawduucyo kala duwan oo xisaabta hore ah ee sawir kasta. Waxaad dhihi kartaa wax la mid ah sidan, "Aan diirada saarno mawduucyada xisaabta ee sawirkan. Maxay yihiin mawduucyo xisaabeed oo kala duwan ee aad ka fikireyso?"



**HAWLQABAD 2.3**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

SAWIRIDA XISAABTA

# HAWLQABAD

Tilmaamaha sawir kasta waa:

“Waalid iyo ilmo yar oo dhallaan ah ayaa kor u wada fiirinaya mobilka. Aaway xisaabta?”

"Ilmaha wuxuu haystaa baabuurta ay ku ciyaaraan carruurta. Aaway xisaabta?"

“Waalid iyo ilmo ayaa dharka ku dhaqaya meesha dharka lagu dhaqo. Aaway xisaabta?”

“Waalid iyo ilmo ayaa ku ciyaaraya baloogyo. Aaway xisaabta?”

“Waalid iyo ilmo ayaa u cadayaya ilmaha ilkihiisa. Aaway xisaabta?”

“Waalid iyo ilmo ayaa wada raacaya baska magaalada. Aaway xisaabta?”

Ka caawi waalidiinta si ay uga doodaan fikradahooda ku hadalka xisaabta.

“Sideed ugala hadli kartaa ilmahaaga xisaabta sawirkan?”

“Maxaad ku tilmaami kartaa?”rf

“Su'aalo noocee ah ayaad weydiin kartaa ilmahaaga?”

“Maxaa laga yaabaa in ilmahaagu sameeyo ama uu yidhaahdo xaaladdan oo aad ku ballaarin lahayd?”

Waxaad la socon kartaa mid ka mid ah shayada tusaalaha adiga oo leh, "waxaan ku siinayaa tusaale..."

Waydii qoysaska inay ka fikiraan mawduucyada xisaabta sawir kasta. "Maxaad laga yaabaa inaad u tilmaamtid si aad u bilowdo wada-hadal ku saabsan xisaabta?" Haddii ay xayiran yihiin oo aysan ka fikiri karin wax fikrado ah, soo jeedi talooyin adiga oo isticmaalaya Hagaha Jawaabta.



HAWLQABAD 2.3

Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota
© 2025

SAWIRIDA XISAABTA

# HAWLQABAD

## HAWL IYO FALANQAYN

**Qaybta 1aad**: 10-15 Daqiiqo

Kordhinta kale ee hawshan ayaa ah in qoysasku isticmaalaan sawiradooda iyaga oo isticmaalaya sawirro taleefankooda, ama sawirro kale oo gaar ah, si ay u helaan xisaabta. Tusaale ahaan, Xirfadlaha Taageerada Qoyska wuxuu soo bandhigi karaa Instagram #parentscount si ay u muujiyaan sawirrada maalinlaha ah sida kuwan hoose, oo ay uga hadlaan waxa xisaabta ku jira sawir kasta.





Markaad hawsha fulinayso, hubso inaad ku hagatid sawir kasta in ku filan inaad ka hadasho. Ku degdegista sawirrada waxay keeni kartaa in la waayo fursado lagu heli karo xisaabta.



Marka ay waalidiintu ka hadlayaan sawirrada, ogeysii oo xooji tusaalooyin kasta oo ay bixiyaan waalidiinta kuwaas oo ka yimid khibradahooda. Tusaale ahaan, haddii waalid uu yiraahdo, "Marka aan beddelo xafaayadda ilmahayga waxaan jeclahay inaan tiriyo faraheeda gacmaha iyo faraha lugaha, waxaanan ka hadlaa meesha ay wax ku jiraan – waxaan idhaahdaa waxyaabo ay ka mid yihiin, 'Masaxyada ayaa ku xiga xafaayadda. Xafaayadaha waxay saaran yihiin khaanadda qashinka.'"




Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota
© 2025


# HAWLQABAD

## Xiritaanka
**(5- 10 Daqiiqo)**

Ku dar waxyaalahan muhiimka ah ee laga qaadanaayo kulanka marka aad soo xirayso wada hadalka waalidiinta. Waxaad ku sheegi kartaa si qoraal ah, ama u qeex si ku salaysan khibradaha waalidiinta:

- Noocyo badan oo xisaabeed oo kala duwan ayaa ka dhaca khibradaha maalin kasta. Waalidiintu waxay ka heli karaan fursado waayo-aragnimadooda maalin kasta si ay ugu daraan wada-hadal ku saabsan mawduucyo xisaabeed oo kala duwan oo ay la yeeshaan carruurtooda.
- Waalidiintu inta badan waxay la sameeyaan xisaab carruurtooda iyagoon ogayn inay xisaab samaynayaan. U fiirso xisaabta, oo ka hadal. Tani waxay ka caawisaa ilmaha inuu barto erayada xisaabta taasoo laga yaabo inay taageerto fikirka xisaabta.

Si loo xoojiyo waxbarashada, weydii qoysaska iney kula qaybsadaan ama kula wadaagaan hal wax oo ay ka barteen xisaabta hore ee hawlqabadkan.




Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota
© 2025

## SAWIRIDA XISAABTA
# ISBEDDELKA

## DA'DA ILMAHA

Tixgeli da'da carruurta qoysaska aad la shaqeyso. Haddii carruurtu aad u yar yihiin, sida kuwa ka yar 3, ka fiirsada sida hadalka xisaabeed ee waalidiinta u kala duwanaan karaan marka la barbar dhigo waxa waalid uu ku odhan karo ilmo wayn. Ka caawi waalidiinta inay dib u eegaan marka ay carruurtooda su'aalo weydiinayaan, iyo marka qaabaynta iyo calaamadaynta la isticmaali karo.

U muuji waalidiinta inay ku haboon tahay in bixinta nuxurka wax yar adag waxa ay u malaynayaan in ilmahoodu samayn karaan, sababtoo ah waxay kor u qaadi karaan guusha carruurtooda. In ilmaha la taageero waxay u muuqan kartaa sidii waalid uu ka caawinayo ilmahiisa inuu "gaadho" waxyaabo adag isagoo ka hadlaya, ama siinaya tilmaamo, si uu u hago fahamka ilmaha.

Haddii waalidiintu leeyihiin carruur waaweyn (4 iyo ka weyn) waxaa laga yaabaa inay la qabsadaan hadalka xisaabta si ay ugu daraan su'aalo ama xirfado aad u adag oo ku saabsan mawduucyo kala duwan, sida ka fikirida wareegga maskaxda ee qaababka iyo xallinta dhibka fudud ee xisaabta.

## WAQTIGA IYO AGABKA

Haddii aad haysato wakhti xaddidan oo aad kula wadaagto hawsha waalidiinta, ka fiirso inaad doorato 1 ilaa 3 sawirro oo aad wakhtiga u isticmaasho inaad ku kordhiso mawduucyada ku jira sawir kasta.

Hawshan waxa loo beddeli karaa si loogu isticmaalo sifada laga heli karo Zoom, Canvas, ama meelaha kale ee kulan ee isku midka ah ama la mid ah. Dhammaan sawirrada agabka waalidka waxaa lagu qiyaasi karaa iyadoo la isticmaalayo "shaashadda wadaagga."

Haddii kale, waxaad isticmaali kartaa fiidiyowyo gaar ah oo muujinaya waalidiin ku hawlan hawl maalmeedka caadiga ah, oo isticmaal su'aalaha doodda fiidiyowyadan.


© 2025

SAWIRIDA XISAABTA

# ISBEDDELKA

Inta doodu socoto, waxaad isticmaali kartaa sabuur cad, meel dhijitaal ah sida jamboard-ka, ama waxaad wadaagi kartaa dukumeenti Google ah si aad ula socoto fikradaha waalidiinta.

Xidh hawsha adiga oo la wadaagaya ka qaybgalayaasha liiska fikradaha maskaxda lagu hayo.

## TAAGEERADA WAALIDIINTA

Haddii waalidiinta aad la shaqeyso ay u baahan yihiin tixgelin dheeraad ah si ay uga qayb-qaataan, hubi inaad ku taageerto baahidooda sida:

- Usoo bandhig qoraal kooban
- Bixinta dhammaan agabka oo lagu qoray luqadda hooyo ee waalidiinta (oo leh tarjumaad marka ay khuseyso)
- Waalidiinta leh xirfado wax-akhris xaddidan, hubso inaad bixiso maqal (waxaad duubi kartaa faylalka maqalka ah ama waxaad akhrin kartaa agab) oo ka qayb qaado dood halkii akhris laga baahnaan lahaa.




Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota
© 2025

SAWIRIDA XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## QAYBTA 1AAD








**HAWLQABAD 2.3**

**Math & Numeracy Lab,**
**University of Minnesota**

© 2025

SAWIRIDA XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

QAYBTA 2AAD











**HAWLQABAD 2.3**

Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota

© 2025

SAWIRIDA XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## QAYBTA 3AAD











**HAWLQABAD 2.3**

Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota

© 2025



SAWIRIDA XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## QAYBTA 4AAD








**HAWLQABAD 2.3**

Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota

© 2025

## SAWIRIDA XISAABTA
# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA
## QAYBTA 2AAD TUSAALEYAAL

"Waalid iyo dhallaan ayaa si wadajir ah u eegaya mobil-ka. Aaway xisaabta?"

- Waalid ayaa oran kara, "Eeg sida ay qaababka u dhaqaaqayaan! Kan wuxuu ka sareeyaa, kan kalena waa hooseeyaa, wuuna kuu dhow yahay." Ama, "Waa kuu muuqataa dayax, waa qaab beele. Xiddigaha sidoo kale waa jiraan. Xiddigaha waxay ka dambeeyaan dayaxa."

"Ilmo ayaa haysta baabuurta lagu ciyaaro. Aaway xisaabta?"

- Waalid ayaa oran kara, "Baabuurta waxay u safan yihiin si toosan. Kee ayaa ugu horreeya?" Ama, "Kee ayaa ugu dheer?" Ama, "Ma jiraan meelo baabuurta oo dhan ku filan?" Ama, "Haddii aan safno baabuurta, imisa baabuur bay le'eg tahay wadada ilaa teendhooyinka buluugga ah iyo kuwa cad? Aan cabbirno!"

"Waalid iyo ilmo ayaa dhar dhaqaya meel dharka lagu dhaqo. Aaway xisaabta?"

- Waalid ayaa oran kara, "Waxaan u baahanahay siddeed qadaadiic si aan mashiinka u shido. Aan tirino marka aad gelinayso." Ama, "Aan duubno shaadhka si uu ugu jiro dambiisha si fiican."

"Waalid iyo ilmo ayaa ku ciyaaraya baloogyo. Aaway xisaabta?"

- Waalid ayaa oran kara, "Waxaad is dul saaray baloogyada! Miyaa taalladu istaagi kartaa haddii ay ka dheer tahay saddex baloog?" Ama, "Waxaan arkayaa inaad baloog guduudan dhigtay agtiisa baloog buluug ah oo saddex-gees ah. Ma haysaa baloogyo kugu filan si aad qaab u samayso?"

"Waalid iyo ilmo ayaa cadayanaya. Aaway xisaabta?"

- Waalid ayaa oran kara, "Hal daqiiqo ayaa ka hadhay. Aan cadayno ilkaha hore. Haddana ilkaha dambe. Ka dibna kuwa kore, ugu dambeyn kuwa hoose."

"Waalid iyo ilmo ayaa wada raacaya baska magaalada. Aaway xisaabta?"

- Waalid ayaa oran kara, "Aan tirino joojimaha ilaa aan gaarno joojimadeenna." Ama, "Eeg daaqaddan. Waxay leedahay hal muraayad oo sare ah iyo laba muraayadood oo hoose ah. Kee ayaa ugu weyn?"



**HAWLQABAD 2.3**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

SAWIRIDA XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## QAYBTA 2AAD TUSAALEYAAL

1) **Pizza**: Qaabka oo dhan; qaabka qayb kasta (ma aha saddex xagal sababtoo ah dhinaca qaloocan!); tirinta (immisa xabbo); sinaanta(gabal walba ma isku mid baa? Haddii ay sidaas tahay, qayb kastaa waa afar meelood meel pizza); booska (dulsaarrada; lakabyada); tirada (oo dusha sare leh qaybaha ugu badan)

2) **Qolof**: Ka wada hadal cabbirada qaraabada qayb kasta; aqoonso qaabka (waa qaab koraya, maaha qaab beddelan)

3) **Qoryo**: Qaababka (dhululubo), tirinta, cabbirka qaraabada, xidhiidhada dhulka.

4) **Khudaarta**: xiriirka dhulka, tirinta; cabbirka (miisaanka, dhererka)

5) **Qaraha**: Qaababka, tirinta, cabbirka qaraabada, sinnaanta.

6)**Kabaha**: Cabbirka qaraabada, nidaamka, lammaanaha, tirinta, qaababka.

7) **Dabool**: qaababka, qaababka, tirinta, cabbirka, xiriirka dhulka, summaynta.

8) **Saxaarad baraf ah**: Tirinta, xidhiidhada dhulka (safka), qaababka, mugga (dalool cube ka badan oo buuxa), cabbirka.

9) **Legos**: Qaababka, xiriirka dhulka, tirinta, cabbirka qaraabada, sinnaanta.

10) **Xididada caleenta**: Qaababka, cabbirka qaraabada, booska, tirinta.



**HAWLQABAD 2.3**

**Math & Numeracy Lab,**
**University of Minnesota**

© 2025

# HAWLAHA LOOGU TALAGALAY XIRFADLAYAASHA TAAGEERADA QOYSKA:
# Sahaminta Xisaabta Hore

"Habka Xisaabinta" waxaa loo sameeyay Xirfadlayaasha Taageerada Qoyska si ay ula adeegsadaan qoysaska ay u adeegaan. Dhammaan waxqabadyada waxaa lagu heli karaa lacag la'aan, gudaha machadka Xisaabta Horumarinta Ilmaha iyo website-ka Tirooyinka, si gaar ah loogu isticmaalo qoysaska iyo waalidiinta. Qalabkan ayaa laga yaabaa maaha in dib loo soo saaro ama loo qaybiyo mid kasta oo loogu talagalay dadaalka faa'iidada iyada oo aan oggolaansho cad laga helin horumarinta hogaanka, Drs. Wackerle-Hollman iyo Mazzocco.

**Cutub 1: Sida Fikirka iyo Dabeecadaha ay u Saameyn karaan Xisaabta Hore**

Hawlqabad 1.1 Qof Walba Wuu Guulaysan
Hawlqabad 1.2 Aragtii Cusub
Hawlqabad 1.3 Habka Xisaabinta
Hawlqabad 1.4 Ka Barashada Khaladaadaha Xisaabta
Hawlqabad 1.5 Fikrado, Su'aalo, iyo Wada-Hadal
Hawlqabad 1.6 Hagaajinta Hab-Dhaqanka
Hawlqabad 1.7 Waxaan Nahay Dhamman Dad Xisaabed

**Cutub 2: Xisaabtu waa tirooyinka iyo in ka badan: Sahaminta Mawduucyada Xisaabta Hore**

Hawlqabad 2.1 Kaleidoscope Xisaabta
Hawlqabad 2.2 Mawduucyada Xisaabta Hore
Hawlqabad 2.3 Sawirka Xisaabta
Hawlqabad 2.4 Kor U Qaadis!
Hawlqabad 2.5 Barashada Socod Baradka

**Cutub 3: Helitaanka Xisaabta ee Nolosha Maalinlaha ah**

Hawlqabad 3.1 Sheekooyinka Guusha Xisaabta Hore
Hawlqabad 3.2 Cuntooyinka Fudud Ee Xisaabta
Hawlqabad 3.3 Raadinta Xisaabta Qarsoon
Hawlqabad 3.4 Xisaab Ku Muuji Fikirkaaga
Hawlqabad 3.5 Ficilka Xisaab Maalmeedka
Hawlqabad 3.6 Jadwal Maalinle ah oo Fudud

Hawlahan waxaa soo saaray Shaybaarka Xisaabta iyo Tirooyinka, oo uu hogaaminayso Michèle Mazzocco, Machadka Horumarinta Carruurta (ICD), iyada oo la shaqaynaysa waa Alisha Wackerle-Hollman, Agaasimaha IGDI Shaybaarka, Waaxda Cilmi-nafsiga Waxbarashada, labadaba Jaamacadda Minnesota. Wax ku darsaday waxaa ka mid ah ardayda dhaktornimo ICD Sarah E. Pan, MA, iyo Jasmine R. Ernst. Shaqadan waxaa taageeray Heising-Simons Foundation DREME Network Awards 2018-0670 iyo 2020-1777. Waxaan u mahadcelineynaa Shaybaadhka Xisaabta iyo Tirooyinka ee gacan ka geystay shaqadan, Xirfadlayaasha taageerada qoyska kuwaas oo bixiyay jawaab celin ama nagu soo dhaweeyay (iyo hawlaheenna) fasalladooda, iyo la-taliyeyaasha jaalkayaga bulshada kuwaas oo bixiyay fikrado ku saabsan xulashada luqadda oo keenay sawirro si ay shaqadani uga dhigto mid macno leh beelaha Laatiinka iyo Soomaalida.

UNIVERSITY OF MINNESOTA MATH & NUMERACY LAB

© 2025

IGDI LAB